

Yaraynta isticmaalka korontada guriga



Caqliga ka shaqeysii markaad isticmaaleysid korontada

Yaraynta isticmaalka korontada guriga waa mid ka mid ah siyaabaha ugu fudud ee lagu heli karo biilal koronto oo raqiis ah. Hadba inta uu isticmaalka korontadaada ka sii yar yahay ayuu qarashka kuu badbaadayana ka sii badan yahay.

Qalab badan oo guryaha yaala sida mikrowave-yada, jaajarada telefoonnada, modem-ka, jalmadaha korontada ku shaqeeya iyo qalabka rootiga lagu kululeeyo ma isticmaalaan koronto badan.

Qalabka korontada ugu badan isticmaala waa kuwa wax kululeeya iyo qaboojiyaha, sida kuleyliyaha, iyo qaboojiyaha. Waa kuwan qaar ka mid ah talooyin ku saabsan sida loo yareayn karo qarashka ka dhasha qalabkan adiga oo si wanaagsanna ugu raaxaysanaya gurigaaga.

Sida ay kuugu baaqan karto lacagta kululaynta iyo qaboojinta

- Dami kuleyliyaha ama qaboojiyaha markasta oo aadan ku jirin qolka. Ha ku bixin kharash kulayliye iyo qaboojiye aadan isticmaalayn.
- Ka xiro albaabbada gurigaaga meelaha aadan isticmaalayn. Hadba inta boosku ka yar yahay, way ka jaban tahay marka la kululeynayo ama la qaboojinayo.
- Xir daahyadaada si kulaylku gudaha uusan uga bixin xilliga qaboobaaha, iyo kulaylka xagaaga.
- Isku day inaad xirto daldaloolada ku wareegsan albaabbadaada iyo daaqadahaaga.

Mashiinka dharka dhaqo/qasaalada



Markaad dhar dhaqaneysid, u isticmaal biya qabow inaad ku dhaqidid halkii aad ka isticmaali lahayd biyo kulul. Tani waxay kuu badbaadin kartaa ilaa \$115 sanadkii.

Talooyinka kululaynta



20°C

Ku qiyaas kuleyliyahaaga 20 digrii.



Haddii aad haysato qaboojiyaha wax kululeeya isla markaasna qaboojiyaha, u isticmaal kuleylinta. Kuwani waxay isticmaalaan koronto yar marka loo eego kuleyliyaha fiilooyinkooda darbiga la galiyo (plug in).



Isticmaal bustayaal koronto ku shaqeeya intaad daaran lahayd kuleyliyahaaga habeenkii oo dhan. Waxay qiyaastii 20 jeer ka jaban tahay kuleyliyaha.

Talooyinka qaboojinta



24°C

Ku qiyaas qaboojiyahaaga 24 digrii si ay lacag kuugu baaqato oo aad ugu raaxaysato.



Isticmaal marawaxada haddii aad leedahay. Marawaxaduhu waa hab raqiis ah oo lagu qaboojiyo gurigaaga.



Haddii aad leedahay daahyada kor loo jiido, hoos u dhig inta lagu jiro kuleylaha si aysan kuleylka qoraxda gudaha usoo galin.